



**WARBIXIN MACAAMIISHA  
KU SOCTA**

**DADKA QAATAY SHARCIGA  
DARAJADIISU TAHAY QAXOOTI-  
NIMADA EE JINEEFA**

MAAHANMUUTTOVIRASTO

MIGRATIONSVERKET

FINNISH IMMIGRATION SERVICE

**WARBIXIN DHEERAAD AH OO KU SAABSAN IN QOFKA QOYSKAAGA AHI UU  
FINLAND KA DALBAN KARO SHARCI DAGANAANSO AH**

Qofka qoyskaaga ahi wuxuu Finland ka dalban karaa sharci daganaansho ah. Inta badan in qofka daganaanshaha la siiyo waxaa shardi u ah in noloshiisa la kafaalo qaaday.

Warbixintani waxay ku socotaa oo khusaysaa, haddii aad tahay qof sharciga magan-galyada ama ogolaanshaha in qaxootinimo loo soo qaato qofka oo Finland la keeno ah heshay **1.7.2016** ama **wixii ka dambeeyey**.

Haddii qoyskaagu yahay mid aan unugtay ama samaysmay ka hor inta aadan Finland imaan adigoo (magan-galyo codsade ah) ama ka hor inta aan Finland ku soo qaadin sida (qaxootiga la keeno), qofka qoyskaaga xubinta ka ahi **wuxuu dalban karaa sharci daganaansho ah oo uu dalkan ku soo galo isagoo aan shardi looga dhigayn saddexdii bilood oo ahayd in masaariiftiisa iyo noloshiisa la ka faalo qaado**. Wakhtiga saddexda bilood ah waxaa laga soo xisaabinayaa marka magan-galyo codsaduha ama kan qaxootiga la soo qaatay ah go'aanka ogolaashaha ah laga gaaro maalinta la siiyo go'aanka ayaa wakhtigu saddexda bilood ah ee la rabo inay sharciga dadkiisu ku dalbadaan ah ka bilaabmayaa.

Qoyskaagu waa codsan karaa sharciga daganaanshaha ah oo ku salaysan xiriir qoys xataa saddexda bilood ka dib. Waxaase markaas lagugu xirayaa inaad keento caddayn ah in aad dadka lagu keenayo masaariifto ama noloshooda balan qaadi karto si la mid ah dadka kale ee qoyskooda dalbanaya. Haddii qoyku uu yahay mid unkamay ama samaysmay ka dib intii uu Finland yimid (magan-galayo codsada) ama kan helay ogolaanshaha (qaxootiga la soo qaatay) ka dib markay Finland yimaadeen qoys la unkay, waxaa markaas ku taabanaya oo adiga ku qabanaya shardigii ahaa masaariifta dadka la keenayo in la kafaalo qaaday.

Dalbashada dadku waa lacag. Qiimayaasha dalabka ama codsiguna waxay ku yaaliin oo ku qoran yihiin ciwaanka internetka ee emagarayshanka ama Maahanmuuttovirasto.

**Sidan baa u codsanaysaa dadka saddex bilood gudaheed:**

Codsiga daganaanshaha lagu dalbayo waxaa la geeyaa oo laga buuxbuuxiyaa saafaradaha Finland ee dibadda. Dhamaan dadka sharciga daganaanshaha dalbanayaa waa in ay tagaan safaarada, macaa caruurta. Diyaargarooqga daganaanshaha sharciga dalbashadiisa waxaa fiican in horay loo bilaabo, laakiin waa marka **hesho sharci oo go'aan lagaa gaaro**. Qoysku waxaa laga yaabaa inay u baahdaan fiise si ay ku tagaan wadanka safaaradu ku taal. Adiga ayaa masuul ka ah in qoyskaagu ay tagaan oo gaaraan wadanka safaaradu ku taal inta aan wakhtigu ka dhamaan.



Horay u sii baro oo ka baar ciwaanka internetka oo oogow halka ay saafaradu ku taal iyo sida codsiga loo qorto oo loo geeysto. Xafiiska emagarayshanka ama Maahanmuuttovirasto shaqo kuma laha inuu kuu sheego safaarada ay tagayaan qoyskaagu iyo siday danahooda u dhamaysanayaan.

**In aad safaaradda codsi geeysato waxaa badanaa u shardi ah inaad balan qabsato. Balanta waxaa lagu qabsan karaa oo kaliya e-mail la soo diro. Haddii codsiga ama dalabka xerayntiisu aysan u baahnayn balan in la qabsado, waa in codsiyada lagu geeyo safaarada oo laga xereeyo mudada saddexda bilood gudaheeda ah.** Haddii laakiin codsiga xerayntiisu u baahan tahay in balan la qabsado, waa in aad sida ugu dhakhsaha badan ugu dambayn saddexda bilood gudaheeda aad safaaradda aad codsiga is lee dahay geeysa ula xiriirto oo balan uga qabsato si aad codsiga u geeysato oo dalabka u buuxbuuxsato. Waana in aad marka aad balanta qabsanayso ugu sheegto safaaradda **fariintaada e-mailka ah** dhamaan dadka kula socda oo doonaya inay sharciga dalbadaan. Waa in aad u sheegto dhamaan magacyadooda, da'dooda dhalashada oo dhamaystiran, jinsiyadooda **iy waxa aad isu tihiin dadka** iyo sidoo kale magacaaga, maalintaa dhalatay, jinsiyadaada iyo lambarka macmiilka ee aad xafiiska emagarayshanka ama Maahanmuuttovirasto ku lee dahay.

Haddii aad sida qaabka kor lagu soo sheegay ah ula xiriirtay safaaradda mudada saddexda bilood ah gudaheeda marka laga soo bilaabo maalinta aad go'aanka sharciga qaadatay, laakiinse safka safaaradda ka jira aawadiis aadan helin wakhti aad codsiga ku dhaafto mudada saddexda bilood ah gudaheeda, qoyskaagu waxay markaas codsan karaan daganaanshaha iyada oo aan lagu xirayn shardigii ahaa in masaariifta noloshooda la ka faalo qaado. Waxaase shardi u ah taas in ay wakhtiga balanta ah ee loo qabtay codsigooda safaaradda ku geeystaan. Haddii in ay kula dhaafto mudada saddexda bilood ah ay u sabab tahay wax kale oo aan ahayn sabab ay kuu keeneen hawl-wadeenada Finland, waxaa markaas shardi lagaaga dhigayaa inaad keento caddayn ah inaad dadkaaga biilan karto.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shardigan kafaalo qaadida masaariifta iyo waxyaalaha khilaafi kara oo looga gudbi karo waxaad ka helayaa